Minnesota Department of Education

Su'aalaha iyo Jawaabaha ku taxluqa Shuruudaha Qiimaynta Qalinjabinta

Maxay yihiin shuruudaha qiimaynta qalinjabinta?

Si xaq loogu yeesho shahaado ka socota dugsi guud ee Minnesota, ardada oo idil waa in ay qanciyaan shuruudaha qiimaynta qalinjabinta. Ayadoo la eegayo dib-u-eegis lagu sameeyay Xeerarka Minnesota, qeybta 120B.30 (Minnesota Statutes, section 120B.30), shuruudaha qiimaynta qalinjabinta waa ay baddalmeen. Waxaa jiraa waddooyin duwan ee lagu qancinayo shuruudaha qiimaynta qalinjabinta taaso ku xiran sanadka ugu horreeyay ee lagu qoray darjada 8aad. Waalidka/ilaaliyeaasha waa in ay la soo xariiraan dugsiga ardaygooda si ay ku helaan macluumaad dheeraad ah.

Ayadoo ay jiraan isbaddallo lagu sameeyay shuruudaha qiimaynta qalinjabinta, tafaasiil iyo macluumaad dheeraad ah waxaa laga sii heli doonaa shabakadda MDE markii loo baahdo. Fadlan qoraalka qadda buluugga riix si aad ku heshid qaybta Waalidka Keliya ee shabakadda MDE si aad ku heshid macluumaadkii ugu dambeeyay. (Gal qaybta Just for Parents > Testing Information.)

Maxay yihiin waddooyinka lagu qancinayo shuruudaha qiimaynta qalinjabinta ee gobolka?

Ardada Darajada 12 ama ka Weyn ee Sanad-dugsiyeeka 2014–2015 (ee markii ugu horreesay isku qoray darajada 8aad 2010–2011 ama kahor)

Aradadaan waxa ay shuruudaha qiimaynta qalinjabinta ku ku qancin karaan akhriska, xisaabta, iyo qorista iyagoo sameeya iskudarka saddexda fursadood ee hoos lagu xusayo inta shuruudaha mid kasta laysaga rabo lagu qancinayo.

1. La qanciyo qiimaynta qalinjabinta ayado loo marayo Qalinjabinta Shuruudda Qiimaynta u Xiran (GRAD) ee akhriska, xisaabta iyo orista curiska, kuwaaso uu ku jiro:
    - Mutaysashada dhibco aqoon loo leeyahay. Haddii ardadu aqoon u leeyihiin (gaareen Qanciyay ama Ka Sare Maray Heerarka) ee darajada 10 Qiimaynta Akhriska Wada Koobaan ee Minnesota (grade 10 Reading Minnesota Comprehensive Assessment - MCA) iyo/ama darajada 11 ee Xisaabta MCA, waxa ay iyaga markaa qanciyeen shuruudaha qiimaynta qalinjabinta ee maaddooyinkaas.
        - Tani waxa kaloo loo adeegsanayaa ardada qaadatay MCA-La Baddalay (MCA-Modified)[1] ama Imtixaamka Xirfadaha Waxbarashada ee Minnesota (Minnesota Test of Academic Skills-MTAS) oo galay booska MCAs.

[1] 2013-2014 waxa uu ahaa sanad-maamuleedka ugu dambeeyay ee qiimaynta MCA-Modified.

- Muteysashada dhibcaha gudbidda ama lagu baasayo ee Qorista Curiska Grad ama Akhriska iyo dib u qaadashada imtixaammada Xisaabta GRAD.
    - Qiimaynta Duwan ee Minnesota (Minnesota Alternate Assessment): Qorista ayaa loo dhammaystiri karaa ardada u bahaan qiimayn duwan si ku qanciyaan shuruudaha akhriska.
- Qancinta GRAD ee loo marayo waddooyin duwan, kuwaaso ay ku jiraana waxa soo socda:
    - Mutaysashada dhibcaha gudbidda ee shaqsiyeed (loogu talagalay ardada ku jira IEP ama qorshaha 504)
    - Helitaanka ka dhaafidda bartaha luqadda Ingiriiska (EL)
    - La qanciyo gobol kale mudnaantiisa qiimaynta oo ay oggolaatay MDE (wax-is-waydaarsasho)
    - La qancayo xisaabta loo maro shuruudaha waddada duwan ee xisaabta, laga rabo oo keliya ardada markii koobaad isku qoray darayda 8aad muddadii u dhaxaysay 2009-2010 (kuwaaso ay u badantahay in ay ka weynyihiin darajada 12)

AMA

2. Ardada waxa ay qaadan karaan ACT, WorkKeys, Compass ama Armed Services Vocational Aptitude Battery (ASVAB) si ay ku qanciyaan shuruudaha qiimaynta ee akhriska, xisaabta, iyo/ama qoritaanka.

AMA

3. Dugsi degmo ayaa ku baddali kara dhibco duwan, qiimayn u dhiganta si lagu qanciyo shuruudaha qiimayanta qalinjabinta.

Ardada Darajada 11 ee Sanad-dugsiyeedka 2014–2015 (ee markii ugu horreysay ku qornaa darajada 8 2011–2012)

Ardadaan waxa ay qancin doonaan shuruudaha qiimaynta qalinjabinta ayagoo ku jiray ka qaybqaadashada 11 ACT Plus Writing haddii ay ka qaybqaateen intuu uu ku jiray nidaamka gobolka oo idil gu'ga 2015.

Laakiin, haddii uusan arday ka qaybqaadan darada 11 ACT Plus Writing ee gu'ga 2015, ardada waxa ay ku qancin karaan shuruudaha qiimaynta qalanjabinta ee laysaga rabo akhriska, xisaabta, iyo qorista iyadoo loo marayo isku darka saddexda fursadood midkood ee sida kor loogu xusay hoosimaanaya "Grade 12 Student and Older in School Year 2014–2015." Waxa ay ku xitantahay shaqsi ahaan aradada iyo qoysasooska doortaan waddada ku habboon.

Ardada Darajda 10 iyo ka Yaryar ee Sanad-dugsiyeedka 2014–2015 (ee markii ugu horreysayd isku qoray darada 8 2012–2013 ama ka dambe)

Ardadaan waxa ay ku qancin doonaan shuruudaha qiimaynta qalinjabinta iyago loo soo maraya ka qaybqaadashada dhowr qiimayn ee qiimaynta xirfadda iyo waxbarashada, taaso marka ugu horreysa la bixin doono sanada-dugsiyeedka 2014–2015:

- Laqu qaato darajada 8 qiimaynta xirfadda iyo jaamacadda

IYO

- Lagu qaato darada 10 qiimaynta xirfadda iyo jaaamacadda

IYO

Dgmooyinku waa in ay siiyaan ardada oo idil fursadaha ay uga qaybgalayaan Qiimaynta Darajada iyo Machadka. Si kastaba, waxaa jiri kara dhowr sababood oo ah sababta aanay uga qaybgali karin. Ardadan looma diidi karo shahaadada sababtoo ah in aanay ka qaybgalin Qiimaynta Darajada iyo Kuliyadda.

- Ardada aan ka qaybgali karin qiimaynta duruufo gaara leh (tusaale ardada u soo guuray Minnesota kadib qimaynta maamulka darajada iyo machadka)

Waalidka/ilaaliyaha ayaa go'aan ka gaari kara shaqsiyaadka ardada aan ku habboonayn ka qaybgalka. Waalidka/ilaaliyaha waa in ay qoraal ku siiyaan dugsiga go'aankooda.
Ardada haysata Barnaamijka Waxbarashada Shaqsiyadeed (IEP) xaqna u leh Imtixaamka Xirfadaha Waxbarashada ee Minnesota (Minnesota Test of Academic Skills - MTAS) waxa ay ka qayb qaadan karaan Akhriska 10 ee MTAS ama Xisaabta darajada 11 ee MTAS (11 Mathematics MTAS) (amaa ay qaataan labadaba qimaynnaba) si ay ku qanciyaan shuruudaha qiimaynta qalinjabinta. Warqadda xaqiiqada ee MTAS Parent Fact Sheet waxaa laga helayaan shabakadda internetka MDE si lagu helo macluumaad dheeraad ah. (Gal qaybta Just for Parents > Testing Information.)

Dugsiga ardaygaaga kala soo xariir wixii macluumaad dheeraad ee ku taxluqa qancinta shuruudaha qiimaynta qalinjabinta:

Wixii maclumaad dheeraad ah, la soo xariir:

Statewide Testing
mde.testing@state.mn.us

Minnesota Department of Education
1500 Highway 36 West
Roseville, MN 55113-4266
http://education.state.mn.us

Janaayo 2015